Kristiansand boligselskap KF

XEERARKA NIDAAMKA AQALKA

Guud ahaan

- Masuuliyadda kiraystaha waxa qeexaya Xeerka Kiraynta Guryaha, heshiiska kirada iyo xeerarka nidaamka aqalka. Haddii aad degantahay guryo iskaashato ama saamiley ah, waa inaad isla markaana ku dhaqantid xeerarka iyaga u gaarka ah. Ku xadgudubka xeerarka nidaamka waxa loo arkayaa ku xadgudubka heshiiska kirada guriga, waxaanay keeni kartaa in qofka laga qaado talaabo. Waa inaad gashid caymiska alaabta guryaha si aad u degi kartid guryahayaga.
- Shirkadda guryuhu waxay leedahay bog internet oo u gaar ah www.krsbs.no halkaasoo aad ka helaysid tilmaamo, iftiiminta waxyaalaha aad fili kartid iyo fiidyowyo ku saabsan isticmaalka guryaha.

Waajibaadka dayactirka

- Adiga ayaa ka masuul ah dayactirka gudaha guriga, sida ku qoran Xeerka kiraynta guryaha juska 5-aad iyo heshiiska kirada.
- Waa inaad ilaalisid banayn qasabada biyaha wasakhda ah ee xidhmay si looga hortago in biyuhu qubtaan. Nadiifinta faroxalka, daloolka biyuh maraan ee musqusha iyo meelaha kale ee biyaha wasakhda ah maraan waxa laga rabaa adiga kirayste ahaan.
  Dhammaan biyaha daata waa in la tirtiro isla markiiba. Waxay arrintaasi khuseysa miisaska kijinka, dhulka iyo meelaha kale. Waxa haboon in dharka lagu qalajiyo dibedda.
- Qashinka waa in lagu rido caagaga qashinka. Qashinka waa in la kala saaro oo lagu tuuro meelaha loogu talogalay. Sida kalena maaha inaad qashin ama waxyaalo kale ku tuurtid musqusha. Subagga yaan lagu shubin musqusha ama meelaha lagu faradhaqdo, laakiin waa in lagu dhex shubo qashinka.
- Dhammaan qolalka guriga waa in loo kululeeyo qaab ka ilaalinaya in biyaha la cabo iyo biyaha wasakhda ah noqon baraf.
- Adiga ayaa ka masuul ah baraf gurista iyo dayactirka goobaha dibedda sida caws jarista, dhir gaabinta iyo goynta waxyaalaha xun, haddii aan wax kale lagu dhigin heshiiska kirada.

Dab ka hortagga

- Waa inaad ogaatid oo baratid meelaha dab-sheegaha iyo qalabka dab-demisku yaalaan. Haddii gurigu leeyahay qasabada guud oo biyaha laga xidho, waa inaad iyana ogaatid meesha ay ku taalo.
- Waa inaad bateriyada dab-sheegaha beddeshid ugu yaraan hal mar sannadkii
- Waxa muhiim ah inaad dabka ka saartid mashiinka sameeya kafeega si aad uga hortagtid dab.
- Qalabka korontada: Ha isku taxin fiilooyinka xadhig kordhinta ah
- Qalabka korontada: Marnaba dharka ha ku qalajin hiitarada/qol kululeeyaha.
- Ha isticmaalin shumaca guban kara haddii aad shidan rabtid shumac

Dhigista gaadiidka iyo alaabta

- Baabuurta iyo dhugdhugleyda waa in la dhigo goobaha loogu talogalay ee ka baxsan guryaha. Haddii gurigu leeyahay boos baabuur oo u gaar ah, waa in kaas la isticmaalo. Gaadiidka loo dhigo sio aan waafaqsanayn xeerkan iyo/ama gaadiidka aan lahayn calaamad (taarigo) waa la qaadayaa, kharashkana waxa bixinaya mulkiilaha.
- Waa in aan daaradaha la dhigin qashin iyo alaabo, si ay u noqdaan meelo bannaan oo amaanka u wacan. Baaskiilado, baabuur-barafka (kjelke) iyo baabuur carruurta lagu riixo maaha in la dhigo daaradahada.
- Waa madnuuc weyn in xaabo ama alaab la filayo in cayayaan ku jiraan la dhigo dabaqa hoose, garaashka ama bakhaarka. Macluumaadka ku saabsan ka akhriso heshiiska kirada guriga.

SOMALI

Sii kiraynta guriga

- Sii kirayn, oo ah in qof kale laga sii kireeyo guriga, lama oggola.

Haysashada xayawaanka iyo isticmaalka sigaarka

- Lama oggola in sigaar lagu cabo gudaha lamana oggola in xayawaan lagu haysto guriga.

U sheeg shirkadda guryaha

- U sheeg shirkadda guryaha haddii aad aragtid cillado ka taagan guriga sida biyo daatay, dab-demiyaha gacanta, dab-sheegaha iyo waxyaalo la mid ah oo xun, waana inaad u soo sheegtid xafiiska macmiisha.
- La soo xidhiidh shirkadda guryaha haddii fuyuusku xumaado in badan.
- Adiga ayaa ka masuul ah furayaashaada. Haddii furayaashu kaa lumaan waxaad la soo xidhiidhi kartaa xafiiska macmiisha si aad u iibsatid kuwo cusub. Waxannu rabnaa inaad furayaasha ka dalbatid xafiiska xataa haddii aad degantahay guri ka mid ah iskaashato ama saamiley.
- Waa inaad markiiba u sheegtid xafiiska macmiisha haddii aad ogaatid in xayawaanka/cayayaanka khasaaraha keenaa ku jiraan guriga ama goobaha ka dhexeeya dadka.
- Ma rabtaa inaad rinjiyeysid gurigaaga, wax ka beddeshid dibedda, wax ka beddeshid guriga ama tusaale ahaan soo xidhatid anteenka (dhiish)? Waa inaad marka hore ogolaansho ka codsatid xafiiska macmiisha.
- Guriga waxa kiraysatay kadib markii aad codsi u soo dirtay qaybta guryaha ee Waaxda Caafimaadka iyo arrimaha bulshada. Haddii isbeddel ku yimaado tirada dadka degan guriga, waxa kugu waajib ah inaadbu soo sheegtid qaybta guryaha.
- Lama ogola in la kireeyuhu guriga ama qaybo ka mid ah guriga.

Rakibaada qasaaladda dharka iyo qasaaladda weelka

- Qasaaladda yaan lagu rakibin kijinka haddii aanay lahayn meel biyuhu maraan ama qol kale oo aan lahayn meel ku haboon oo biyuhu maraan. Haddii khasaare yimaado waxa khasaaraha biyuhu keenaan ka masuul ah kiraystaha, amm shirkada caymiska ee kiraystaha. Sidaas si la mid ah haddii khasaare biyo ka yimaadaan sariiraha biyaha, berkadda kaluunka iwm.

Deganaansho (buuq la'aan)

- Waa in dadka deriska ah iska ilaaliyaan buuqa aan loo baahnayn. Maalmaha oo dhan wakhtiga u dhexeeya 23.00 iyo 07.00 waa in buuq ka jirin guryaha.
- Qalabka muusiga, raadyowga, telefeeshanka, qasaaladaha iyo wixii la mid ah yaan loo isticmaalin qaab dhib ku ah deriska.

Ogeysiinta iyo waxa ka iman kara – waa in lagu dhaqmo heshiiska kirada

- Si looga hortago in guryaha laga saaro dadka degan, waxa noo muhiim ah in qof kasta ogyahay waxa dhacaya marka la buriyo heshiiska kirada ama xeerarka nidaamka aqalka:

- Shirkadda guryuhu mar kasta way soo dalacdaa kharashka ka yimaada tusaale ahaan burinta heshiiska kirada.
- Marka si weyn loo buriyo heshiiska kirada waxa dhici in qofka laga saaro guriga isla markiiba.
- Qofkana lama siinayo heshiis cusub haddii uu si weyn u buriyo heshiiska.
- Haddii xadgudub dhaco waxa mar kasta farriin walaac ah loo dirayaa masuulka kiiska ee Waaxda caafimaadka iyo arrimaha bulshada.
- Haddii aanu rabno samayno kormeer dab ama wax la mid ah waa inaad soo soo deysid guriga.

SOMALI

Lambarada telefoonka

- ✓ Boolis 112 / Gargaarka caafimaadka 113 / Dhakhtarka heeganka ah (legevakt) 116117 / Dam-demiska 110
- ✓ Shirkadda guryaha 38075500 – saacadaha 08.00-15.00. Eeg www.krsbs.no
- ✓ Shirkadda guryaha telefoon 90535433 – marka xafiisku xidhanyahay ama jiraan wax degdeg ah
- ✓ Qaybta guryaha (Hawlaha adeegga iyo maamulka, Waaxda caafimaadka iyo arr. bulshada) 38075000 – saacadaha 08.00-15.00.

Kristiansand, 7. desember 2016

Soosaaristii 0 ee xeerarka nidaamka aqalka